



## Cleveland oo markii 7<sup>aad</sup> ee isku xigta ku guuleysatay horyaalka PIL ee lagdinta

Kooxda lagdinta ee Cleveland waxay sii waday awood badnaanteeda la xiriira Naadiga Dugsiyada Ka Dhexeeya ee Portland iyada oo ku guuleysatay horyaalmada shakhi ahaaneed ee toddoba heerar oo ah miisaanadda kala duwan iyada oo si fudud ugu guuleysatay tartankii degmada ee Sabtidii ka dhacay Dugsiga Sare ee Marshall.

Warriors waxay keeneen 355.5 dhibcood si ay si fudud uga kor maraan kooxda ay tartamayeen ee Franklin, oo gashay kaalinta labaad iyada oo keentay 257.

Ardayga ciyaartooyda ah ee sanadkii u dambeeyay dhigta Cleveland ee Aaron Kemper ayaa ku guuleystay horyaalka sanadkii labaad ee isku xigta. Ka markii uu ku guuleystay horyaalka miisaanka 132-pound, Kemper wuxuu ku guuleystay 145 ka dib markuu uu dhulka ku xajiyay 'pinned' ardayga ciyaartooyda ah ee sanadkii saddexaad dhigta Franklin ee Kevin Balawing taasi oo qaadatay 2 daqiiqado, 28 ilbiriqsi ee ciyaartii horyaalka. Taasi waxay timid ka dib markii Kemper uu ku guuleystay labadiisa ciyaarood ee hore ahaa dhulka ku xajinta 'pinfall' taasii oo qaadatay 1:49 daqiiqo iyo 48 ilbiriqsi.

Ardayga ciyaartooyda ah ee sanadkii saddexaad dhigta Cleveland ee Jontae Hardaway ayaa wuxuu waqti yar ku qaatay gogosha 'mat' lagu ciyaarayay, isaga oo lagdamay 2 daqiiqo 25 ilbiriqsi kuwaasi oo ahaa saddex ciyaarood si uu ugu guuleysto horyaalka miisaanka 106. Hardaway ayaa dhulka ku xajiyay 'pinned' ciyaartooygii ka soo horjeeday taasi oo qaadatay 47 daqiiqo iyo 26 ilbiriqsi ka dib intaanu dhulka ku xajin 'pinned' ardayga ciyaartooyda ah ee sanadkii saddexaad dhigta Roosevelt ee Kenner Mizee kaasi uu waqtiga kama dambeystu uu ahaa 1:12. Hardaway, oo horumar sameeyay 39-5 xilligan ciyaaraha, wuxuu u tartamey kaalinta kama dambeysta ah xilli-ciyaareedkii hore.

Warriors waxay sidoo kale helaan horyaalada ardayda ciyaartooyda ah ee sanadkii koowaad dhigata ee Elija Fishler oo ku guuleystay miisaanka 113 iyo Patrick Brown oo ku guuleystay miisaanka 126, ardayda ciyaartooyda ah ee sanadkii saddexaad dhigata ee Lwenay Say oo ku guuleystay miisaanka 120, Oliver Borg oo ku guuleystay miisaanka 152 iyo Dustin Jorgenson oo ku guuleystay miisaanka 170.

Afarta ugu sareysa heerka kasta oo waxay u gudbayaan horyaalada gobolka ee Class 6A, iyada Cleveland ay yeelatay lix kale oo ah ciyaartooyda lagdinta oo soo baxay.

Tartanka gobolka waa la qaban doonaa Febraayo 16-17 isaga oo ka dhacaya Veterans Memorial Coliseum.

**Dabaasha:** Horyaalada gabdhaha iyo wiilasha ee PIL ee dabaasha waxaa la qaban doonaa Jimcaha iyo Sabtida iyaga oo ka dhacaya Dishman Community Center.

Marka lagu daro caleemo saarka qofka iyo horyaalnimada kooxda, kulanku wuxuu noqonayaa iskugu soo baxa kulanka gobolka. Ku guuleystayaasha tartan kasta waxay u soo gudbayaan ka gobolka, iyada oo ay weheliyaan horyaal kale iyo xulashada u gudubta kaalinta kama dambeysta ah haddii ay buuxiyaan heerka soo gudbida. Boosaska kale ee gobolka, haddii ay jiraan, waxaa la siiyaa dadka dabaasha iyo kooxaha ciyaaraha fudud ee keena waqtiyada ugu sarreeya ee marka la qabto tartanka dadka iskugu soo baxa kaalinta kama dambeysta ah ee degmada.

Kulanka gobolka waxaa la qaban doonaa Febraayo 16-17 isaga oo ka dhacaya Mt. Hood Community College ee ku taala Gresham.

*-Mike Tokito*